Dib u noqosho xor ah

Halkaan waxaad ka akhriso karta, waxaa ku khuseeyso haddii aad ku fakareeyso in aad ku laabato dalkaada hooyo iyo nuuca caawinaada aad heli karto. Marmarka qaar-kood, waxaad cawinaad xataa uu heli kartaa haddii aad rabto in aad uu laabato dal dalkaada hooyo aan aheeyn.

Yaa dalbankara dhaqaalaha dib u noqoshada wadankaaga hooyo?

Waxaad dalban kartaa deeqda dhaqaale, haddii aad sharciga ku heshay sidaan soo socota:

– sida aqoonsi qaxootinimo
– sida magangalyo doon
– haddii ay jiraan xaalado tabardaro keeni karta, (ee u dhigma shuruucda u dhigan dadka waayeelka ah)

ama

– tiro dad qoxootiya oo la soo qaatay.

Xataa qaar ka mid ah eheladaada waa ay dalban karaan deeqdaan dhaqaale, waase haddii aad adigu soo gelisay, sharcigana u qaaday.

Si laguu siiyo deeqda dhaqaalahaan ee dib u noqoshada dalkaaga hooyo ah, waa inaad adiga iyo eheladaaduba cadaysaan inaydaan iska bixin karin kharashka safarka. Eheladaada waxaa looga jeedaa, ninka/naagta ama isla degen iyo ciyaalka 18 ka yar.

Ma codsan kartid deeqda dib u noqoshada haddii aad dhalashadda iswidhishka haysato.

Maxaa ku dhacaya sharciga degenaanshuha haddaan Iswiidhan ka guuro?

Waaxda Socdaalku (Migrationsverket) waxaa ay dib kaaga celinaysaa sharciga, haddii aad u guurto wadankaaga hooyo ama wadan kaleba. Laakiin haddii sharciga aad ku heshey magangalyo ama qoxootinimo oo aadna wadan aad horey ugu noolaan jirtey ku laabato, waxaa sharciga lagaa celinayaa laba sano ka dib maalintaad, guurtay.

Ma heli karaa sharci mar labaad haddaan go´aansado inaan dib u soo laabto?

Waad dalban kartaa sharci cusub. Codsigaasna waxaad u geeynaysaa safaaradda ama qunsuliyad-da ugu dhow meesha aad ku sugan tahay. Sharciga degenaanshahu waa in la ogolaadaa, laguna dhejiyaa baasaboorka intaadan soo gelin Iswiidhan.

Marka waaxda socdaalku (Migrationsverket) dacwadaada ay qaadayaan, waxaa ay tixgelin sii-nayaan xiriirka aad ku leedahay Iswiidhan. Waxaa markaasna aan hoos u eegeynaa inta aad degenayd Iswiidhan oo aad sharciga lahayd iyo inta aad degeneyd wadankaaga hooyo ama wadanka kale. Wax saameeyn sharcigu uu ku yeelanayo ma jirto haddii waaxda socdaalku ay horey kuu siiyeen deeqda safarka.

Tusaale ahaan jidka ay raacayaaan Waaxda Socdaalku (Migrationsverket) marka ay go´aan ka gaarayaan sharciga waa:

– Haddii aadan Iswidhan ka maqnayn wax ka badan hal sanno, waad heli kartaa sharci degenaansho cusub, xataa haddii aad ku nooleeyd markaagii hore Iswiidhan muddo gaaban.
– Haddii aad Iswiidhan ka maqnayd hal ilaa saddex sanno, waa inaad Iswiidhan ku noolayd markaagii hore ilaa ugu yaraan afar sanno, oo aad sharci ku lahayd, si sharci degenaansho cusub laguu siiyo.
– Haddaad Iswiidhan ka maqnayd waqti ka badan saddex sanno, waad heli kartaa sharci-ga degena-anshaha, haddii aad ku nooleyd Iswidhan (10-15 sanno) aadna lahayd sharciga degenaanshaha markaagii hore.

Migrationsverket

972 018 Faktablad om vad du ska tänka på när du vill återvandra. Finns översatt till albanska, arabiska, bosniska/kroatiska/serbiska, engelska, franska, pashto, somali, sorani och spanska. Produktion: Verksamhetsområde kommunikation. Webbplats: www.migrationsverket.se

- Haddii aad guursatay markaas wadankaaga hooyo u laabatay, markaas caadiyan kuma xisaabtami kartid inaad Iswidhan ka heleyso sharci cusub maadaama aad markii hore ku nooleeyd darteed.

Deeqda dhaqaale ee safarka maxaa ku jira?

Lacagta deeqdu waxaa ay ka kooban tahay, in aad ku bixinayso kharashka safarka, iyo qeyb kaah ah ee la rabo inaad ku noolaato muddada ugu horeysa ee aads wadankaaga hooyo joogtid. Lacagta kaashka ah waa 10 000 kr, oo loogu tala galay qofka qaangaarka ah, carruurta ka yar 18 sanno, waxaa la siinayaa 5000 kr. Familka waxaa ay heli karaan ugu badnaan, 40 000 kr.

Waxaa lagu siinayaa kharashka, diyaaradda, tareenka, baska iyo baabuurkaagaba.

Dhaqaale laguuma siinayo inaad u safarto wadankaaga hooyo si aad u soo baartid haddaad ku noolaan karto iyo in kale. Lagaama bixinayo kharashka aad ku qaadanayso alaabta guriga.

Maxaa shuruud lagugu xirayaa?

Waa inaad haysataa baasaboor sharciyaysan ee wadankaaga hooyo, waana inaad dhiibtaa cinwaan wadankaaga ah. Haddii aadan heli karin baasaboor wadankaaga ah, waxaad la xiriiri kartaa si aad u hesho warbixin dheeraad ah Waaxda Socdaalka (Migrationsverket). Mararka qaarkood waa inaad soo gudbisaa dukumenti dheeraad ah iyo warbixino dheeraad ah. Haddii aad rabto inaad u guurto wadan aan wadankaaga hooyo ahayn, waxaa waajib kugu ah inaad na tusto inaad wadankaas ogolaansho u haysato inaad degto. Haddii loo baahdo xataa waa inaad na tustaa inaad u haysato fiisooyin wadama aad sii marayso, markaad wadankaaga u socoto.

Waxaa xataa waajib kugu ah inaad soo bandhigto daymaha lagaaga leeyahay halkaan amaba hantida kuu taala Iswiidhan iyo wadankaaga hooyaba amabase wadanka kale ee aad degeyso.

Waad bixinaysaa daymaha Iswiidhan amaba heshiis la gal (bankiga ama dayn bixiyahaaga) ee aad lacagta ka qabto.

Sidee u dalbanayaa deeqdaas?

Waxaad ku dalbanaysaa adoo buuxinaaya, foomka lambarkiisu yahay, Migr 4453, oo aad ka soo saaran karto bogga internetka ee Imigarayshinka ama imigrationka laftiisa ka dalbo hakuu soo diraane.

Bogga internetka ee waaxda socdaalka waa: www.migrationsverket.se. Foomka waxaad xataa ka heli kartaa degmada xafiiskeeda qaabilaada qoxootiga, ama xafiiska ajnabiga iyo xafiiska dib u noqoshadda. Codsiga waxaad u diraysaa: Migrationsverket,
Resebidrag, 601 70 Norrköping.

Codsiga lacagta kharashka waxaad ka lifaaqaysaa:

- Koobiga baasaboorkaaga oo ku cad waqtiga uu ku eg yahay, magacagana ku dhigan yahay,
- sugnaan (reer ma leedahay, iyo hadday caruur jirto, yaase xanaanadooda sharciga ah leh).
- Koobiga warqadda canshuuraha ee sanadkan oo aad ka soo qaado, xafiiska canshuuraha, qofkasta oo qaan gaar ahna sidaas ayuu yeelayaa.

Haddii waalidku ay wada haystaan xanaanadda carruurta si wadajir ah, waa in waalidka carruurta la noqonaya uu ruqsad qoraal ah ka haystaa waalidka joogaya.

Goorma iyo sidee dhaqaalaha deeqda loo bixinayaa?

Lacagta kaashka ah adiga ayaa lagu siinayaa, oo jeeg boosto ayaa lagu siinayaa.

Familkoo dhan ma wada noqonayaan si wadajir ah?

Maya, uma baahnidin inaad wada baxdaan. Haddii deeqdaas la ogolaaday, waxaa la bixinayaa oo kaliya markaad Iswiidhan ka tegeysid. Haddii qof ka mid ah familka uu joogaayo Iswiidhan, waxaa dhaqaalaha deeqda la siinayaa qofka baxaya, waxaana farta laga saarayaa markuu qofkaasu Iswiidhan ka tegeyo.

Yaa qaban qaabinaaya safarka Iswiidhan lagaga tegayo?

Markii Waaxda Socdaalku (Migrationsverket) uu go´aan ka gaaro inuu bilyeetiga iyo lacagta kaashka ah bixinayo, waxaa laguu soo dirayaa jawaab. Waxa ana lagugu wargelinayaa inaad la xiriirto xafiiska canshuuraha ee kuu dhaw. Waxaadna halkaas ka dalbanaysaa inaad

Migrationsverket

cinwaankaaga si joogta ah u wareejiso, adoo buuxinaaya foomka la yiraahdo, ”Flyttning till utlandet”. Waa inaad foomkaas ku qortaa in guuritaankaagu uu yahay mid waligiis ah. Markaad codsigaas gudbiso waxaa lagu siinayaa koobi ah inaad cinwaankaaga wareejisay. Koobigaasna waxaad u direysaa Waaxda Socdaalka (Migrationsverket) oo markaas lacagta kuu soo diraya, tigidhka diyaaradana kuu sheegaya meeshaad ka qaadanayso.

Waqti fiican u sheeg Waaxda Socdaalka, (Migrationsverket), goorta aad rabtid inaad baxayso, si safarka laguu diyaariyo sidaad u rabto.

Ma rabtaa inaad intaa wax ka badan ogaatid

La xirriir Waaxda Socdaalka, (Migrationsverket) haddii aad wax su´aala ah qabtid ee ku saabsan markii wadan kale loo guurayo. Taleefoonka imigrayshinka waa: 010-485 92 36, (telefonka guud 0771-235 235) ama xafiisyara degmooyinka.

Waxaad kale oo la xiriiri kartaa, invandrarbyrå (xafiiska ajnabiga), flyktingmottagning (xafiiska qaabilaada qoxootiga) ama återvandringskontoret, (xafiiska dib u guuridda) ee degmadda aad degen tahay. Waxaad xataa caawimaad ka heli kartaa:
Svenska Röda Korset,
(Bisha Cas)
Kontoret för frivillig återvandring
(xafiiska dib u noqoshadda)
Arabygatan 31
SE-352 46 Växjö
tel. 0470-74 79 32

Laga soo xigtay: Nidaamka (qodobkan) sharciga ah (SFS 1984:890) ee ku saabsan taakulaynta dhaqaalaha safarka ee ajnabiga Iswiidhan ka noqonaaya, dibna ugu noqonaaya inuu dego wadan kale. Bedelidii ugu dembeysey ee nidaamkan (qodobkan) waa SFS 2006:11

Migrationsverket